



Liiska Erey-bixinta ee Miisaaniyadda Sannad-Dugsiyeedka 2026

Allocation - Qoondaynta

Lacag loo qoondeeyay ujeeddo gaar ah.

Appropriation - U Qorsheynta

Lacago loo oggolaaday miisaaniyadda lagu daboolayo kharashaadka.

Authorized Headcount - Madaxa La Oggolaaday

Tirada jagooyinka shaqo ee ay degmadu buuxin karto. Tirada jagooyinka shaqo ee la buuxiyay wakhti walba ee sannadka gudihiisa ah way ka duwanaan doontaa tirada shaqaale ee la oggol yahay sababtoo ah ceyrinta shaqaalaha, hannaanka shaqaalaynta, iyo sababo kale awgood.

Attrition - Faaruqin

Hoos u dhac shaqaale oo dabiici ah kaasoo saameeyo shaqaalaha iyo xafiiska shaqaalaha ka dib iscasilaadda, hawlgabka, dhimashada, iyo u wareegidda jago kale.

Average Daily Membership (ADM) - Celceliska Xubinnimada Maalinlaha ah

ADM waxay ka dhigan tahay qayb ka mid ah sannad-dugsiyeedka xilli uu ardaygu ka diiwaangashan yahay degmada muddo cayiman. Xilliga ADM la mid ma ahan qornaanshaha ardayga. (Eeg Isqoritaanka.) Gobolku wuxuu isticmaalaa xogta ardayda iskucelcelis ahaan ka qoran degmada xilli cayiman (ADM) si loo go'aamiyo maalgelinta iskoollada.

Benefits - Dheefaha

Waxaa ka mid ah FICA, hawlgabka gobolka, magdhawga shaqaalaha, caymiska, iyo kharashyada hawlgabnimada hore.

Board of Education - Guddoonka Waxbarasho

Koox la doorto oo maxalli ah, sida caadiga ah inta u dhaxeysa saddex ilaa toddoba xubnood, kuwaas oo dejiyo xeerarka maaliyadeed, shaqaale, waxbarasho, iyo xeerarka la xiriiro ardayda. Guddiga iskoollaha ayaa sidoo kale wuxuu degmada siiyaa jihayn, isagoo shaqaaleyn karo ama ceyrin karo isuduwaha guud oo wuxuuna guddigu ansixiyaa miisaaniyadda iyo qandaraasyada ururada metelo shaqaalaha.

Budget - Miisaaniyad

Qorshe maaliyadeed oo loogu talagalay kharashaadka hawlgalka ee degmada iyo raasumaalkeeda, wareejinta maalgelinta, dakhliga la filayo, iyo ilaha kale ee la filayo iyo adeegsiga lacagaha.

Capital Projects and Building Construction Fund - Lacagta Mashaariicda iyo Dhismaha

Wuxuu ka dhigan yahay ilo maaliyadeed ee loo isticmaalo iibsashada ama dhisidda ama qalabaynta dhismayaasha degmada. Abuuridda sanduuqan lacageed waxaa lagu soo oggolaaday afti ku aaddaneyd mashaariicda raasumaalka ah ama afti aheyd deyn-qaadasho.

Collective Bargaining - Gorgortan Guud

Hannaan lagu dhisayo qandaraas u dhexeeya iskoollada degmada iyo ururada/iskaashatada metelo shaqaalaha.

Community Service Fund - Sanduuqa Adeegga Bulshada

Wuxuu ka dhigan yahay adeegyada la siiyo dadka deggan aagagga leh adeegyada medaddaalada, waxqabadyada, ardayda aan dhigan iskoollada dadweynaha, barnaamijyada dadka waaweyn ama carruurnimada hore ama adeegyo kale oo la mid ah.

Cost-of-Living Adjustment (COLA) - Wax ka Beddelka Kharashka ku Baxo Biilka Noloshaha

Kordhin maalgelin oo ka timid gobolka ama federaalka taasoo loogu talagalay iskoollada si shaqaalaha loogu gudo kharashka dheeriga ah ee sicir-bararku sababay.

District Leadership - Hoggaanka Degmada

Waa Isu-Duwaha Guud, Kooxda Hoggaanka Sare ee Fulinta, iyo Maamulayaasha Waaxda Degmada

Debt Service Fund - Sanduuqa Adeegga Deynta

Wuxuu ka dhigan yahay ururinta kheyraadka iyo bixinta deynta guud ee asalka aheyd, dulsaarka, iyo kharashyada la xiriiira. Aasaasidda sanduuqan waxaa lagu oggolaaday bixinta deynta.

Deficit Spending - Kharashka Dheeriga ah ee na Galay

Waa marka uu kharashku ka bato dakhliga muddo cayiman, oo sidoo kalena loo yaqaan kharash dheeri ah oo na galay ama miisaaniyad dheeri ah oo na gashay

English Learner (EL) - Barashada Ingiriisiga

Ardayda afkooda hooyo aan Ingiriisi ahayn kuwaasoo u qalma caawimaad luuqad oo dheeraad ah.

Enrollment – Waa Is-Qoritaanka

Tiro ka mid ah ardayda ka qoran iskool walba iyo degmo walba maalintii la eegaba. Tirada ardayda ka qoran iskoolka horraantii sannadka ayaa inta badan ka badan tirada isku celceliska imaanshaha maalinlaha ah ee ardayga (ADM) taasoo la xiriirta arrimo ay ka mid yihiin guuritaanka ardayda ama xulashada fursado kale oo waxbarasho.

Equipment and Facility Maintenance - Dayactirka Qalabka iyo Dhismayaasha

Dayactirka meelaha baabuurta la dhigto iyo waddada looga baxo dhismaha, dayactirka nidaamka korontada iyo farsamada, dayactirka cilladaha koodka xag caafimaad iyo xag amni, rinjiyeynta, beddelida kuraasta iyo miisaska fasalka, qiimeynta magaalada iyo soo iibsashada qalabka.

Expenditures Per Pupil - Kharashaadka Arday Walba

Lacagta ay degmada iskoolka ama gobolka ku bixiyeen waxbarashada taasoo loo qeybinayo tirada ardayda wax la baray.

Federal Programs - Barnaamijyada Federaalka

Dakhli ka yimaado dowladda federaalka si loo caawiyo barnaamijyada taageero ardayda sida Title (I-X) iyo Waxbarashada Gaarka ah.

Fiscal Cliff - Nusqaan Maaliyadeed

Isku-dheellitirnaan la'aan salka ku haysa dakhliga la hayo iyo kharashka hawlaha harsan, taasoo abuuraysa hoos u dhac miisaaniyadeed haddii aan wax laga qaban isku-dheellitirnaan la'aanta.

Fiscal Year (FY) - Sannad-Maaliyadeedka

Muddo ah laba iyo toban bilood oo billaabanaysa 1-da July taasoo dhammaato 30-ka June ee sannadka xiga. FY26 (oo ah Sannad-Maaliyadeedka 2026) waxaa loola jeedaa muddada July 1, 2025, ilaa June 30, 2026.

Food Service Fund - Sanduuqa Adeegga Cuntada

Waxay ka dhigan tahay dakhliga iyo kharashaadka adeegga cuntada.

Fund Balance (Baakhiga Miisaaniyadda ee Sanduuqa ku Jira)

Tan oo sidoo kale mararka qaar loo yaqaan Keydka (Reserve), waxaa baakhigan sanduuqa ku haray ka mid ah akoon loo qoondeeyay miisaaniyadda iskoollada degmada si loo bixiyo kharashyada loo baahdo mustaqbalka, si loo dheellitiro kharashyada nagu baxo mustaqbalka iyo bixinta raasumaalka lagu hawlgalo, ama si loogu bixiyo ujeedooyin kale sida maalgashiga iyo maareynta khataraha.

Full-time Equivalent (FTE) - U Qalma Wakhtiga Shaqo leh Saacado Buuxa

Ereyo lagu cabbiro tirada guud ee shaqaalaha shaqeeyo saacadaha buuxa ee ka shaqeeya hay'ad.

Fund Accounting - Akoonka Maalgelinta

Lacagaha iyo habraacyada kala duwan ee degmada kuwaasoo ay abuureen Waaxda Waxbarashada ee Minnesota iyo Guddiga Heerarka Akoonka ee Dowladda ee la dhaho Governmental Accounting Standards Board (GASB).

General Fund - Sanduuqa Guud

Sida caadiga ah, waa sanduuqa maalgelinta ugu weyn ee dhammaan hawlgallada degmada. Waxay ka dhigan tahay dhammaan ilaha maaliyadeed marka laga reebo kuwa la doonayo in maalgelin ahaan lagu xisaabiyo sanduuq kale. Waxaa ka mid ah kharashaadka gaadiidka iyo raasumaalka, kuwaas oo si rasmi ah loogu daro sanduuqa maalgelin gooni ah.

Individualized Education Program (IEP) - Barnaamijka Waxbarashada Shakhsi Ahaaneed (IEP)

Qorshe loogu talagalay arday gaar ah kaasoo qeexaya waxa ardaygaas u baahan yahay inuu barto wakhti cayiman iyo adeegyada gaarka ah ee loo baahan yahay in la bixiyo iyadoo lagu saleynayo awoodda ama waxyaabaha uusan awoodin ardayga. Ardayda helo adeegyada IEPs sidoo kale waxaa laga yaabaa in laga dhafo qaadashada imtixaannada ama inay u qalmaan hawl fududeyn dheeraad ah, sida imtixaanka lagu galo qalabka Braille.

Lane Change (Beddelidda Laynka Mushaaharka)

Shaqaalaha haysta laysinka waxay xaq u leeyihiin inay helaan mushaahar loo kordhiyo haddii ay dhammaystirtaan waxbarasho dheeraadka ah, sida shahaadada labaad ee jaamacadda. Mushahaar kordhintaan waxaa lagu magacaabaa beddelidda laynka mushahaar.

Mandated Costs - Kharashyada Amran

Kharashaadka degmada iskoolka ee degmada loogu amray sababo la xiriiira sharciga federaalka ama gobolka, go'amada maxkamadda, xeerarka maamulka degmada ama qaabab kale loogu amray.

Personnel Costs - Kharashaadka Shaqaalaha

Dhammaan kharashyada la xiriiira mushahaarka saacadlaha ah, mushahaarka billaha ah, iyo dheefaha loogu talagalay dhammaan shaqaalaha.

[Purchased and Contracted Services - Adeegyada ku yimid Qaab libsi iyo Qandaraas](#)

Waa adeegyada laga soo iibsaday meel ka baxsan degmada sida kharashka ku baxo daabacaadda, kharashka taleefanka, boostada, safarka shaqaalaha, kharashka horumarinta xirfadaha shaqaalaha, la-taliyayaasha degmada, safarrada gaaaban ee waxbarashada ardayda, dayactirka qalabka, iwm.

[Return on Investment \(ROI\) - Soo Celinta Wixii la Maalgashaday](#)

Waa qaab loo isticmaalo in lagu qiimeeyo waxtarka ama taabagalka maalgashiga. ROI waxay isku dayeysaa inay si toos ah u cabbirto faa'iidada ka soo noqoto maalgashi gaar ah, markii loo eego qiimaha maalgashigii la sameeyay.

[School Leadership - Hoggaanka Iskoolka](#)

Waa maamulaha iskoolka iyo maamulaha dejinta manhajka waxbarasho.

[Shortfall - Nusqaan Kharasheed](#)

Qoondayn lacag ah oo aan ku filnayn inay hawl qabato, taasoo u baahnaaneyso lacag dheeraad ah ama haddii kale keenayso nusqaan maaliyadeed.

[Special Education - Waxbarashada Gaarka ah](#)

Barnaamijyo loogu talagalay in lagu aqoonsado oo lagu daboolo baahiyaha waxbarasho ee carruurta qabo naafo ah xag shucuur, xag waxbarasho, ama xag jireed. Sharciga federaalka wuxuu farayaa in dhammaan carruurta naafada qabo la siiyo waxbarasho bilaash ah oo ku habboon iyadoo loo eegayo Barnaamijka Waxbarashada Shakhsi ahaaneed (IEP) laga billaabo carruurnimada ilaa 21 sano jirnimada.

[Step Increase \(Kordhinta Mushaaharka\)](#)

Tiro boqolley ah oo lagu daro mushaaharka shaqaalaha sannad walba ee uu shaqeeyo. Degmada SPPS ahaan, tani caadi ahaan waa koror ah 3-4% oo mushaaharka lagu kordhiyo sannadkiiba.

[Supplies - Alaabta Fasalka](#)

Waa agabka fasalka, buugaagta maktabadda, qalabka warbaahinta, majalladaha daabacan, iyo qalabka kombiyuutarka. Qalabka Guud ee loo isticmaalo Hawlgallada Xafiiska Degmada

[Trust and Agency Fund - Sanduuqa Deeqda iyo Wakiilnimada](#)

Waxay ka dhigan tahay ilo kheyraad oo ay maamusho degmadu sida inay wakiil u noqoto hay'ado kale. Lacagta deeqaha ah ee la bixin karo waxaa ka mid ah deeqaha xusuusta iyo deeqda waxbarasho iyo sidoo kale noocyada kale ee deeqaha.

[Utilities and Custodial Services - Adeegyada Agabyada iyo Kooxda Nadiifinta](#)

Kharashka lagu qabto hawlaha qalabka waaweyn waxaa ka mid ah adeegyada agab iyo adeegyada tooska ah ee kooxda nadiifinta iskoolada.

Acronyms - Ereyo la soo Gaabiyay

[ABE - Adult Basic Education -](#)

Waxbarashada Aasaasiga ah ee Dadka Waaweyn

[ADA - Americans with Disabilities Act](#)

Sharciga Mareykanka Naafada ah

[AFSCME - American Federation of State, County and Municipal Employees](#)
Iskaashiga Mareykanka ee Shaqaalaha Gobolka, Degmada, iyo Xaafadaha

[ALC - Area Learning Center](#)
Xarunta Waxbarashada Aagga

[AOF - Academy of Finance](#)
Akadeemiyada Tacliinta Maaliyadda

[AP - Advanced Placement](#)
Koorsooyinka Koleejka ee AP

[ARP - American Rescue Plan](#)
Qorshaha Samatabixinta Mareykanka

[ASAP - Association of Supervisory and Administrative Personnel](#)
Ururka Shaqaalaha Kormeerka iyo Maamulka

[ASCD - Association of Supervisory and Administrative Personnel](#)
Ururka Kormeerka iyo Dejinta Manhajka

[ASL - American Sign Language](#)
Luuqadda Dadka Maqalka la' ee Mareykanka

[AYP - Adequate Yearly Progress](#)
Horumar Sannadle ah oo Heer Habboon Joogo

[BOE - Board of Education](#)
Guddoonka Waxbarasho

[CE - Community Education](#)
Waxbarashada Bulshada

[CET - Center for Employment and Training](#)
Xarunta Shaqaalaynta iyo Tababarka

[CGCS - Council of Great City Schools](#)
Golaha Iskoollada Magaalada

[CIF - Census Information Form](#)
Foomka Xogaha Tirakoobka

[CKC - Core Knowledge Curriculum](#)
Manhajka Aqoonta ee Aasaasiga ah

[COB - Committee of the Board](#)
Kooxda Guddiga

[COBRA - Consolidated Omnibus Budget Reconciliation Act](#)
Xeerkii Suluxeed oo Isku Dhafan oo ku Taxalluqa Miisaaniyadda

DOE - Department of Education

Waaxda Waxbarashada

EA - Educational Assistant

Kaaliyaha Waxbarasho

ECFE - Early Childhood Family Education

Waxbarashada Qoyska ee Barbaarinta Carruurta

ECS - Education Commission of the States

Guddiga Waxbarashada Gobolka

ECSE - Early Childhood Special Education

Waxbarashada Gaarka ah ee Carruurnimada Hore

ELL - English Language Learner

Barnaamijka Barashada Luuqadda Ingiriiska

EPA - Environmental Protection Agency

Wakaaladda Ilaalinta Deegaanka

ESEA - Elementary and Secondary Education Act

Sharciga Waxbarashada Dugsiyada Hoose iyo Sare

FAC - Finance Advisory Committee

Guddiga La-talinta Dhanka Maaliyadda

FAPE - Free Appropriate Public Education

Waxbarasho Wanaagsan ee Dadweynaha oo Bilaash ah

FAQ - Frequently Asked Questions

Su'aalaha Soo Noqnoqda

FERPA - Family Educational Rights and Privacy Act

Xeerka Sirta iyo Xaquuqaha Waxbarashada Qoyska

FICA - Federal Insurance Contributions Act

Sharciga Federaalka ee Bixinta Kaalmada Caymiska

FTE - Full Time Equivalent

U Qalma Wakhtiga Shaqo leh Saacado Buuxa

FY - Fiscal Year

Sannad-Maaliyadeedka

GAAP - Generally Accepted Accounting Principles

Mabaadii'da Xisaabaadka Guud ee La Aqbalay

GED - General Educational Development

Koboca Guud ee Waxbarashada

[HIPPA - Health Insurance Portability and Accountability Act](#)
Sharciga Hufnaanta Caymiska Caafimaadka iyo Isla Xisaabtanka

[HR - Human Resources](#)
Waaxda Shaqaalaha

[IB - International Baccalaureate](#)
Shahaadada Caalamiga ah (IB)

[IDEA - Individuals with Disabilities Education Act](#)
Sharciga Waxbarashada Shakhsiyaadka Naafada ah

[LEP - Limited English Proficiency](#)
Xadidinaanta Aqoonta Ingiriiska.

[MAP - Measures of Academic Progress](#)
Qaababka Horumarka Tacliinta

[MCA - Minnesota Comprehensive Assessment](#)
Imtixaan Dhamaystiran ee Minnesota

[MDE - Minnesota Department of Education](#)
Waaxda Waxbarashada ee Minnesota

[MFT - Minnesota Federation of Teachers \(now known as Education Minnesota\)](#)
Xiriirka Macallimiinta Minnesota (oo hadda loo yaqaan Education Minnesota)

[NCLB - No Child Left Behind](#)
Canugna kama Harayo Waxbarashada

[NAESP - National Association of Elementary School Principals](#)
Ururka Qaranka ee Maamulayaasha Dugsiyada Hoose

[NASSP - National Association of Secondary School Principals](#)
Ururka Qaranka ee Maamulayaasha Dugsiyada Sare

[NCES - National Center for Education Statistics](#)
Xarunta Qaranka ee Tirakoobka Waxbarashada

[NEA - National Education Association](#)
Ururka Waxbarashada Qaranka

[OCR - Office for Civil Rights](#)
Xafiiska Xuquuqda Madaniga ah

[OSHA - Occupational Safety and Health Administration](#)
Maamulka Bedqabka Shaqada iyo Caafimaadka

[PEA - Professional Employees Association](#)
Ururka Shaqaalaha Xirfadlayaasha ah

PELRA - Public Employment Labor Relations Act

Xeerka Xiriirka Shaqaalaha Dadweynaha

PELSB - Professional Educator Licensing and Standards Board

Guddiga Laysinka iyo Heerarka Macallimiinta Xirfadlayaasha ah

REA - Research, Evaluation and Assessment

Cilmi-baarista, Qiimeynta iyo Imtixaanidda

RFP - Requisition For Payment

Dalbashada Lacag-bixinta

PSEO - Post Secondary Enrollment Options

Fursadaha Tacliinta Sare ee Kolleejka

SPFE - Saint Paul Federation of Educators

Iskaashiga Macallimiinta Saint Paul

SPPA - Saint Paul Principals Association

Ururka Maamulayaasha Saint Paul

SPPS - Saint Paul Public Schools

Iskoollada Dadweynaha Saint Paul

SPSO - Saint Paul Supervisors Organization

Ururka Kormeerayaasha Saint Paul

TA - Teaching Assistant

Kaaliya Macallinka

UFARS - Uniform Financial Accounting and Reporting System

Nidaamka Isku Jaango'an oo ah Xisaabinta Maaliyadeed iyo Nidaamka Warbixineed

WINN - What I Need Now

Waxa aan Hadda u Baahanahay